



Qiimeynta Waxbarashada Ardayga ee Washington (WASL) iyo Dibaloomaha Dugsiga Sare

Dhamaan ardaydu waxay u baahan yihiin aasaas adag oo wax akhris ah, qorista iyo xirfad la xidhiidha maadada xisaabta ujeedo kasta oo ay qorsheystaan in ay ku dhaqaaqaan marka ay ka gudbaan waxbarashada dugsiga sare. Shuruudo dhowr ah oo heer qaran oo loogu talo galay qalin iibinta ayaa waxay ardayda ka caawiyaan in ay helaan aasaaskan adag. Dhowaan sharci dejiyaasha dawlad gobaleedyadu waxay isbadalo ku sameeyeen Qiimeynta Waxbarashada Ardayga Ee Washington (WASL) ee la xidhiidha qalin Jabinta, oo ay ku jirto dib u dhigista gudbitaanka imtixaanka maadooyinka xisaabaadka iyo ilmiga saynsiga ilaa 2013.

Fasalada qalin jabinta sanad dugsiyeedyada 2008-2012, adayda waxaa u waajibaysa in ay ka gudbaan imitixaanada akhriska iyo qorista ee WASL, oo uu dawlad gobaleedku ansaxiyay oo loogu talo galay WASL ama qiimeyn loogu talo galay adrayda dhinaca waxbarashada khaaska ah. Ardaydu waxay awoodi karaan in ay waafaqsanaadaan shuruuda dawlad gobaleedka ee ku aaddan maadada xisaabta Markey ka gudbaan maadada xisaabta ee WASL fursada kale ee ka maaranshaha ee uu dawlad gobaleedka ansaxiyay ama qiimeynta ardayda dhinaca waxbarashada khaaska, AMA waxaa uu surtoobi karta in ay sii wadaan in ay hantiyaan dhibcaha maadada xisaabta tan iyo inta mudadooda qalin jabinta. Ardayda ka gudubta imitixaanada akhriska iyo qorista iyo qiimeynta xisaabta waxay helayaan Shahaadada Guusha Fursadda Waxbarashada Gaarka (Certificate of Academic Achievement), AMA Shahaadada Naajaxista Shaqsiyadeed ee Waxbarashada (Certificate of Individual Achievement) iyo dabloomaha dugsiga sare. Ardayda ku buuxisa shuruudahooda maadada xisaabaadka helitaanka dhibcaha maadada xisaabta ma helayaan sharaado laakinse waxay hantiyayaan dabloomaha.

Dib u dhacan ee maadooyinka xisaabta iyo ilmiga saaynisigana waxaa uu nidaamka dugsiga u siinaya waqti ay ku meel marsan karaan isbadalada loo baahan yahay ee la waafajinayo heerka waxbarashada ee dawlad gobaleedka, abuurista fursado haboon oo la xidhiidha manhajka dugsiyada, in kadib marka qiimeynta lagu sameeyo qiimeynta in loo fidiyo horumar xirfadeed macalimiinta. Mana aha dib uga laabasho dib looga noqonayo xirfadaha iyo aqoonta uu u baahan yahay arday kasteba. Hadii macluumaad dheeraad ah aad uu baahan tahayna nagalaso xidhiidh: <http://www.k12.wa.us/GraduationRequirements/default.aspx>.

Shuruudaha Qalin Jabinta ee Dawlad Gobaleedka Washington

(Waxaa laga go'aan gaadhaya marka ardaygu uu soo gaadho galaaska sagaalaaad)

Sanad Dugsiyeedka 2008da (Ardayda fasalk 11aad ee 2006-07)	(Sanad Dugsiyeedyada 2009-2012) (Ardayda fasalada 7-10 aad ee 2006-07)	Sanad Dugsiyeedyada 2013 iyo lata ka Sareysa (Ardayda fasalada 6 iyo kahooseya ee 2006-07)
<p>AKHRISKA IYO QORISTA</p> <p>Ku naajaxista akhriska iyo qorista Dugsiga Sare ee Qiimeynta Washington ee Barashada Ardayga (Washington Assessment of Student Learning (WASL)) --AMA--</p> <p>Ku naajaxista Shahaadada Guusha Fursadda Waxbarashada Gaarka (Fursadda talantaaliga ee dawlad gobaleedku ansaxiyo).*</p>	<p>AKHRISKA IYO QORISTA</p> <p>Ku naajaxista akhriska iyo qorista Dugsiga Sare ee Qiimeynta Washington ee Barashada Ardayga (Washington Assessment of Student Learning (WASL)) ama qiimeynta loogu talo galay ardayda dhigata waxbarashada khaaska. --AMA--</p> <p>Ku naajaxista Shahaadada Guusha Fursadda Waxbarashada Gaarka (Fursadda talantaaliga ee dawlad gobaleedku ansaxiyo).*</p>	<p>AKHRISKA IYO QORISTA</p> <p>Ku naajaxista akhriska iyo qorista Dugsiga Sare ee Qiimeynta Washington ee Barashada Ardayga (Washington Assessment of Student Learning (WASL)) ama qiimeynta loogu talo galay ardayda dhigata waxbarashada khaaska. --AMA--</p> <p>Ku naajaxista Shahaadada Guusha Fursadda Waxbarashada Gaarka (Fursadda talantaaliga ee dawlad gobaleedku ansaxiyo).*</p>
<p>XISAAB</p> <p>Ku naajaxista xisaabta Dugsiga Sare ee WASL ama qiimeynta loogu talo galay ardayda dhigata waxbarashada khaaska. --AMA--</p> <p>Ku naajaxista Shahaadada Guusha Fursadda Waxbarashada Gaarka (Fursadda talantaaliga ee dawlad gobaleedku ansaxiyo).*</p> <p>--AMA--</p> <p>Mid kasta oo ka mid ah dhibcaha xisaabta (ama xirfada shaqo iyo koorsada farsamada u dhiganta) fasalka 11aad kadib IYO mar kale qaadashada imitixaanka WASL ama mar kale qiimeynta ansaxisan ee maadada xisaabta (Ardayda looga baahan yahay in ay ku naajaxaan maadooyinka xisaabta, aan ahayn qiimeynta, in ay helaan dibloomaha.)</p>	<p>XISAAB</p> <p>Ku naajaxista xisaabta Dugsiga Sare ee WASL ama qiimeynta loogu talo galay ardayda dhigata waxbarashada khaaska. --AMA--</p> <p>Ku naajaxista Shahaadada Guusha Fursadda Waxbarashada Gaarka (Fursadda talantaaliga ee dawlad gobaleedku ansaxiyo).*</p> <p>--AMA--</p> <p>Mid kasta oo ka mid ah dhibcaha xisaabta (ama xirfada shaqo iyo koorsada farsamada u dhiganta) fasalka 10aad kadib IYO mar kale qaadashada imitixaanka WASL ama mar kale qiimeynta ansaxisan ee maadada xisaabta (Ardayda looga baahan yahay in ay ku naajaxaan maadooyinka xisaabta, aan ahayn qiimeynta, in ay helaan dibloomaha.)</p>	<p>XISAAB IYO SAYNISKA</p> <p>Ku naajaxista Xisaabta iyo Sayniska Dugsiga Sare ee WASL ama qiimeynta loogu talo galay ardayda dhigata waxbarashada khaaska. --AMA--</p> <p>Ku naajaxista Shahaadada Guusha Fursadda Waxbarashada Gaarka (Fursadda talantaaliga ee dawlad gobaleedku ansaxiyo).*</p>
<p>SHURUUDAHA KALE</p> <p>Waafaqiista dhamaan shuruudaha kale ee qalin Jabinta ee dawlad gobaleedka iyo dugsiga degmada: Mashruuca Ugu Sareya, Dugsiga sare iyo Wax Qorshaha kasareya iyo dhamaan shuruudaha kale ee dawlad gobaleedka iyo dhibcaha degmada looga baahan yahay.</p>	<p>SHURUUDAHA KALE</p> <p>Waafaqiista dhamaan shuruudaha kale ee qalin Jabinta ee dawlad gobaleedka iyo dugsiga degmada: Mashruuca Ugu Sareya, Dugsiga sare iyo Wax Qorshaha kasareya iyo dhamaan shuruudaha kale ee dawlad gobaleedka iyo dhibcaha degmada looga baahan yahay (<i>Guddiga Waxbarashada ee Dawlad Gobaleedka ayaa waxaa uu Ka dhigi doona labada dhibcood ee hore ee dhinaca xisaabta looga baahan yahay sida qasabka dhamaan ardayda saddex dhibcood</i>)</p>	<p>SHURUUDAHA KALE</p> <p>Waafaqiista dhamaan shuruudaha kale ee qalin Jabinta ee dawlad gobaleedka iyo dugsiga degmada: Mashruuca Ugu Sareya, Dugsiga sare iyo Wax Qorshaha kasareya iyo dhamaan shuruudaha kale ee dawlad gobaleedka iyo dhibcaha degmada looga baahan yahay (<i>Guddiga Waxbarashada ee Dawlad Gobaleedka ayaa waxaa uu Ka dhigi doona labada dhibcood ee hore ee dhinaca xisaabta looga baahan yahay sida qasabka dhamaan ardayda saddex dhibcood</i>.)</p>

* Waxaa waajib ah in ay qaataan imitixaanka Dugsiga Sare ee WASL marka ay ugu yartahay hal jeer ka hor inta aaney mid ka mid ah ku naajaxista Fursadda Shahaadada Waxbarashada Gaarka.

Warbixiinta la xidhiidha Shahaadada Guusha Fursadda Waxbrashada Gaarka iyo

Shahaadada Naajaxista Waxbarashada

- Shashaadooyinkan waxay tilmaamaan hawlaha iyo kuuliyadaha ee uu ardaygu u leeyahay aasaaska adag xirfadaha muhimka ah iyo aqoonta la xidhiidha wax akhriska, qorista iyo xisaabta. Ardayda hesha shahaadada waxaa loogu qeexaya qoraalka lagu wada in lagu miin guuriyo natiijooyinka dhibcaha (Transcript).
- Shahaadada Guusha Fursadda Waxbrashada Gaarka – Shuruud mid looga dhigayo ardayga maaha ilaa qalin jabintiisa 2013, laakiinse ardaydu waxay ku hantiyi karaan ku guuleysashada imitixaanka WASL ama Shahaadada Guusha Fursadda Waxbrashada Gaarka (Fursadda badalka dawiilad gobaleedku uu ansixiyay) ee ku aaddan Wax-akhriska, qorista iyo xisaabta.
- Shahaadada Naajaxista Waxbarashada Shaqsiga – Waxaa hela ardayda waxbarashada khaaska kaliya. Shuruud mid looga dhigayo maaha ilaa qalin jabinta 2013, laakiinse waxay ardaydu ku hantiyi karaan ku guuleysashada imitixaanka WASL-Dib u habeynta ka lagu sameeyay, Natiijooyinka Urursan ama ku haboonaanshaha Horumarka (Developmentally Appropriate WASL (DAW)) ee ku aaddan akhriska, qorista iyo xisaabta.
- Ardayda ee fasalada 2008-2012 ee hantiya dhibcaha xisaabta illaa qalin jabinta, laakiinse aan ka gudbin WASL ama qiimeyn kale oo ansixisan oo xisaab ah, ayaa waxay wali uu qalmayaan in ay helaan dibloomaha laakiinse ma heli doonaan Shahaadada.
- Waxaa jira nidaam rafacaaneed oo loogu talo galay ardayda ee kasoo wareegay dawlad gobaleedyo kale iyo wadamo kale ama haysta xaalad khaas ah oo aan laga hortagi karin. Ardayda ku guuleysta rafacaankooda ayaa waxay helayaan dibloomaha laakiinse ma heli doonaan Shahaadada.

Warbixiinta la Xidhiidha Dugsiga Sare WASL

- Ardayda waxaa u banaan shan fursadood oo ay dawlad gobaleedyadu- maalgaliyaan wagtigooda dugsiga Sare si ay u qaataan imitixaanka WASL xaaladaha u qalmanaanshuhu: waa akhriska, aorista, xisaabta iyo sayniska.
- Ardayda ku gudubta heerka 3aad ama 4 dhibco.
- Imitixaanka WASL waxaa dhacaan bilaha Maarso/Abril iyo Ogoosto sanad walba.
- Helida dhibcaha rafacaanka: Waalidiinta/lhaalada, kadib marka dib looga baarandego layliisayadooda ardaynada, ayaa waxay usoo gudbisin karaan rafacaanka dawlada gobaleedka.
- Si aad maclumaad dheeraad ah uga heshid imitixaanka WASL, fadlan boqo: www.wasinfo.org.

Shahaadada Guusha Fursadda Waxbrashada Gaarka (badalka uu dawlad gobaleedka uu ansixiyay imitixaanka WASL)

- Ardayda leh xirfad laakiinse aan awoodeynin In ay ku muujiyaan imitixaanka WASL waxaa surtagalka noqon karta in ay isticmaalaan Shahaadada Guusha Fursadda Waxbrashada Gaarka.
- Ardaydu waxaa uu surtagali karta in ay awoodaan mar hadii ay qaataan imitixaanka WASL.
- Shahaadada Guusha Fursadda Waxbrashada Gaarka waxay yihiin:
 - Soo Ururinta Caddeynta – Ardayda waxaa looga baahan yahay in ay soo ururiyaan munadaha ka midka ah waxyaabaha loogu qiimenayo shaqo fasal ahaan ah taasii oo uu ka caawinayo/caawinayaan macalinku (macalimiintu). Soo ururintu waxaa ay ardayda barata xirfada iyo barashada barnaamijiyada farsamadu ku darsan karaan shaqooyin ka mid ah barnaamijiyadooda iyo fasalada kaleba. Dawlad gobaleedku waxay sameysa dhidco soo ururinta laba jeer sanad walba.
 - Dukumeentiyada ka tanaasulida ujrada waxaa heli kara ardayda u qalma kaliya in ay u fadhistaan imitixaanada la ansixiyay ee qiimeynta PSAT, SAT, ACT iyo AP.
 - SAT ama ACT – Waxay dhibcahooda dhinaca xisaabta, akhriska ama Ingiriisiga iyo qorista ay uu isticmaali karaan leyliisayada loogu diyaargarobayo kuuliyada.
 - Dhibcaha ugu yar ee xisaabta ee: SAT – 470; iyo ACT – 19.
 - Dhibcaha ugu yar ee akhriska iyo qorista ee SAT iyo ACT: Waxaa go'aamiin doona Guddiga Waxbarashada ee dawlad gobaleedka markey taariikhdu tahay 1, Deseembar 2007, ama xilli kale oo ka horeysa, hadii ay surtagalk noqoto.
 - PSAT – Waqtigan xaadirka, ardayda waxaa surtagal uu noqon karta in ay soo gudbistaan dhibco xisaabeed oo ka kooban 47 oo fursad ansixigaroobday ah. Inta ka dambeysa 31 Ogoosto 2008, maadaamo PSAT aan loo qiimeyn doonin fursad la ansixiyay oo kale.
 - Imitixaanka Tijaabada Sare (Advanced Placement (AP)) – Ardayda waxaa surtagal ah in ay uu isticmaalaan dhibco gaadhsiisan saddex ama wax kasareya imitixaanada xulka ah ee Imitixaanada Tijaabada ee Sare (AP).
 - Xisaabta: Kaalkaloos (laan ka mid ah xisaabaadka ama nooca istaatiiskada.)
 - Qorista: Luqada ingiriisiga iyo curinta qoraalada arrimaha kala duwan diirada saaraya (Composition and English language)
 - Akhriska: Sugaanta Ingiriisiga iyo curinta qoralada, barashada dhaqaalaha waa weyn, cilmi nafsiga, taariikhda Mareykanka, taariikhda aduunka, hab dhaqanka dawlada Mareykanka, iyo siyaasadeeda, ama isbarbar-dhigista dawlada iyo siyaasada.
 - WASL/Isbarbar-Dhigista Dhibcaha – Ardayga dhibcihiisa Koorsooyinka xisaabta iyo/ama koorsooyinka ingiriisiga waxaa lab barbar dhigaya dhibcaha ardayda kale ee qaatay koorsooyinka la midka ah IYO ka gudbay imitixaanka WASL. Fursadan waxaa loo ogol yahay ardayda fasalada 12aad. Si loo awoodi karo helitaanka fursadaas, ardayga waxaa waajib ku ah in uu yeesho Isku-eel - celiska Darajada Dhibcaha Isu - Geynta Guud (overall cumulative Grade point Average (GPA)) ee ka kooban ugu yaraan 3.2 oo looga baahan yahay in uu ka hantiyo 4.0 cabbirka dhibcaha.

Warbixiinta Qiimeynta Ardayda Waxbarashada Khaaska

- Ardayda waxbarashada khaasku waxaa sartagal ah in ay qaataan imitixaanka Dugsiga Sare ee WASL oo ay la socoto ama aaney la soconin adeega dejintu hooygu ama in ay isticmaalaan mid ka mid ah Shahaadada Guusha Fursadda Waxbrashada Gaarka (Certificate of Academic Achievement Options).
- Fursadahan hoosta ku xusan ayaa iyana meesha taala:
 - Imitixaanka Dib U Habeynta ee WASL – Ardayda qaadata imitixaanka WASL – oo ay la socoto ama aaney la soconin adeega dejinta hooygu – laakiinse ay kooxda IEPdu ugasoo nidaamiso shurudahooda ka gudbitaanka imitixaanadooda heerka khabiriinta ee (Heerk 2aad).
 - Hab Ururinta Qiimeynta Badalka ee Washington (Washington Alternate Assessment System Portfolio) – Ardayda aan awoodeynin in ay qaataan imitixaanada waraaqaha iyo qalin beensilka ayaa waxay kusoo bandhigi doo naan xirfadahooda iyo aqoontooda waxqabadayadooda oo ay isugu keenaan qaab isku urursan.
 - Imitixaanka ku Haboon Horumarka ee WASL (Developmentally Appropriate WASL (DAW)) – Ardayda fasalada 11aad iyo 12aad kaaliya ayaa qaata imitixaanka WASL – hadi uu losocdo ama aanu lasoconin adeega dejinta hooygu – heer fasal ahaan dhigooda ugu wanaagsan iyo kartidooda. Ardayda waxay ka gudbayaan imitixaanka Ku haboon Horumarka (DAW) iyaga oo ka hantiyaya dhibcaha khibradeed ee (Heerka3) imitixaanka kaste ee ay qaateen.
- Imitixaanka Dib U Habeynta (The WASL Modified) waxaa uu qabsooma bilaha Maarso/Aabariil iyo Ogoosto sanad walba. Imitixaanada Qiimeynta Urursan (Portfolio) iyo Imitixaanka Ku haboon Horumarka (DAW) waxay qabsooma bilaha Maarso/Aabariil iyo Nofeembar.